



Macluumaadka Cusub ee Kormeeraha Guud: Musharixiintu waxay la kulmeen kooxaha wax daneeya; Dadka wareysiga iskugu soo haray ee la aqoonsaday

Ogoosto 2, 2017-ka

Shaqaalaha iyo qoysaska PPS ee qaaliga ah,

Inaga oo galeyna toddobaadyadii u dambeeyay ee xagaaga, Guddiga Dugsigu waxay sii wadaa shaqadeeda ay ku shaqaalaysiinayso Kormeere Guud oo noqon doona hoggaamiye waxbarasho oo xoog leh isla markaana wax ku ool ah oo loogu talagalay dugsiyadeena. Waxaan rabnaa in aanu mar kale wax ka tilmaano nidaamkii bishii la soo dhaafay sidoo kale bixino macmuulaad cusub oo ku saabsan nidaamka hore u socda.

Xaaladda

Guddiga PPS waxay nidaam baadi goob oo cusub Luulyo la bilowday 40 hoggaamiyayaal waxbarasho si loo siiyo tixgelin iyada oo ay la xiriirto talooyin laga helay bulshada, urrurka dibada shaqaalaha ka raadiya iyo xubnaha guddiga dugsiga. Guddigu waxay dib u eegen musharixiinta iyada oo dooratay koox dad kala duwan ka kooban oo leh waayo-aragnimo waxbarasho oo qoto dheer si ay u wareystaan.

Musharixiinta kala duwan waxay ka kala socdeen gudaha iyo dibadda Oregon, kormeerayaasha guud ee hada jira iyo sidoo kale hoggaamiyayasha sare ee waxbarashada oo ka socda degmooyinka waaweyn. Iyada oo lagu salaynayo shuruudo ay tahay in la buuxiyo, Guddigu waxay dooratay toddobada musharax oo la wareysto ka dibna waxay laba maalmood ku bixiyeen wareysiga iyo ka wadhadalka musharixiintani.

Wareysiyada Musharaxa ee Guddiga iyo Kooxaha Wax Daneeya

Toddobaadkii la soo dhaafay musharixiintu waxay la kulmeen kooxo waalidiin ah oo wax daneeya, wakiilka ardayda ee Guddiga Dugsiga, macallimiin, shaqaalaha dugsiga, iyo wakiillo ka socda mas'uuliyiinta degaanka ee la doortay iyo urrurada bulshada.

Guddigu waxay codsadeen oo heleen talooyin daacad ah isla markaana wax ku ool ah oo ku saabsan musharixiinta oo laga helay kooxdan iyada oo lagu wargeliyay talaabooyinka xiga ee noo gaarka ah ee nidaamka wareysiga. Way mahadsan yihiin xubnaha bulshada ka tirsan ee ka qayb qaatay!

Talooyinka laga helay kooxda bulshada ka dib, Guddiga PPS waxay u qoondaysay in ka badan 15 saacadood wareysiga masharixiinta. Waxaanu musharixiinta ka codsanay in ay keenaan xog ka socota degmada ay ku nool yihiin oo waafaqsan waxyaalaha ay mudnaanta siinayso PPS, oo ay ka mid yihiin wax akhriska fasalka saddexaad iyo heerarka qalin-jabinta. Waxaanu weydiinay waxa shaqaynayay si loo horumariyo hadafyadan iyo halka horumar looga baahan yahay.

Dadka Wareysiga Iskugu Soo Haray Ee La Aqoonsaday

Iyada oo ay ku saleysan tahay wareysiyadan, waxaanu ku faraxsanahay in aanu aqoonsanay hoggaamiyayaal xoog leh oo leh kuwo badan oo ka mid ah xirfadaha iyo awoodaha wax qabasho ee aan uga baanahay kormeeraheena guud ee soo socda. Waxaanu iskugu soo koobnay oo ka dhignay koox toddoba musharax ka kooban oo dheeraad ah anaga oo aqoonsanay dadka wareysiga iskugu soo haray si loo sii wado nidaamka wareysiga.

Waxaan rajeynaynaa in aanu toddobaadyada soo socda mar kale la kulano musharixiinta isku soo haray si aanu wax badan iyaga uga ogaano anaga oo sii wadi doona in aanu bulshada la socodsiino nidaamkayaga anaga oo u socona tallaabada xigta ee shaqaalaysiinta kormeeraheena guud.

Macluumaadka cusub sidoo kale waxaa laga heli karaa: <https://www.pps.net/Page/9866>

Mar kale, waxaanu wadnaa muhiimada ay siinayno shaqaaleynta hoggaamiye waxbarasho oo diiradda saara ardayda isla markaana leh waayo-aragnimo wax dhisid iyo nidaamyo joogto ah oo taageeraya arday kasta oo ka baxaya dugsiyadeena oo diyaar u ah kulliyad, shaqo iyo nolol. Waad ku mahadsan tahay taageerada aad siisay PPS iyo gacantii aad ka geysatay caawinta in PPS horumariso hadafyadan muhiimka ah.

Julia Brim-Edwards, Guddoomiyaha, Guddiga Waxbarashada
Dugsiyada Dadweynaha Portland